## Waa maxay My Choice?

**Himiladayada**

Waxaa naga go'an horumarinta caafimaadka xubnaha iyo wanaajinta bulshooyinkayaga. Ilaaliyeyaasha hantida dadweynaha ahaan, waxaan ahmiyad siinaa qofka oo dhan iyo fayo-qabka bulshada oo dhan innagoo bixinayna adeegyo dhiirrigeliya madax-bannaani, adeegyo qiimeeya kala-duwanaanta, oo dhiirigeliya isu-doodidda.





## Nagala Soo Xidhiidh

**Halkani waxaan u joognaa inaan ku caawino!**

Na soo wac ama booqo mareegahayaga maanta si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan barnaamijka Family Care.

**Booqo**
mychoicewi.org/family-care/

**Wac Lambarka Bilaashka Lagu Waco**
800-963-0035
TTY: 711

**Si aad u hesho halka ay yaalaan xafiiskayaga maxalliga ah iyo xarunta ADRC ee deegaankaga fadlan booqo:**
mychoicewi.org/family-care/program-locations/

*Adeegyada turjumaanka iyo turjumaadda waa bilaash. Dokumeentigan ayaa lagu heli karaa qaabab kale haddii la codsado. Haddii aad leedahay baahiyo gaar ah, fadlan wac 800-963-0035 si laguu caawiyo. Family Care waa barnaamijka dawladeed oo bixiya adeegyada daryeelka muddada-dheer iyadoo loo marayo Waaxda Adeegyada Caafimaadka ee Wisconsin (Wisconsin Department of Health Services).*

*My Choice Wisconsin ayaa qandaraas kula jirta Wisconsin Medicaid si ay u bixiso barnaamijka Family Care waana hay'adda maaraynta daryeelka oo gobolka shati ka haysata oo Bixisa Shaqooyin Loo Wada Siman Yahay.*

*ATENCÓN: Si habla español, tiene a su disposición servicios gratuitos de asistencia lingüística. Llame al 800-963-0035 (TTY: 711).*



*LUS CEEV: Yog tias koj hais lus Hmoob, cov kev pab txog lus, muaj kev pab dawb rau koj. Hu rau 800-963-0035 (TTY: 711).*

DHS ayaa Ansixisay 1/27/2025

my choice WISCONSIN
BY MOLINA HEALTHCARE

# Family Care



**Family Care ayaa siisa xubnaha caawimaada dheeraadka ah ee ay u baahan yihiin si ay u ahaadaan caafimaadqab iyo badqab.**

*Daryeelku halkan ayuu ka bilaabmaa.*

## Waa maxay Family Care?

Family Care waa barnaamijka si guud loo maalgeliyo kaas oo ka caawiya waayeelka iyo dadka waaweyn ee naafada ah inay maareeyaan baahidooda daryeelka muddada-dheer. Xubnaha ku jira barnaamijka Family Care waxay la shaqeeyaan Kooxda Daryeelka ee maxalliga ah oo ka kooban Maamule Daryeel iyo Kalkaalin Diiwaangashan, iyo qof kasta oo kale oo ay xubintu rabto inay ku lug yeelato daryeelka, si ay u abuurto qorshe la gaar yeelay oo ka caawin doona inay si buuxda ugu noolaadaan sida ugu madax-banaan ee suurtogalka ah. My Choice Wisconsin ayaa taageerta barnaamijka Family Care ee ka kira 50-ka degmo ee Wisconsin.

## Maxaynu qabanaa?

My Choice Wisconsin waa ururka daryeelka la maareeyo oo ku haminaya inay ahmiyad siiyaan xubnaha ka midka ah. Marka ay haystaan dhammaan saddexda barnaamijka ee Wisconsin, xubnaha waxay helaan daryeel muddo-dheer iyo adeegyo caafimaad oo ka caawinaya inay sida ugu fiican ugu noolaadaan si madax-bannaan bulshooyinkooda dhexdooda.



My Choice Wisconsin ayaa si wadajir ah ula shaqeysa hay'adaha maxalliga ah iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka si loo hubiyo in xubnaha ay ka helaan shabakadaha kala duwan dooqyo ku filan iyo taageero tayo iyo adeegyo sare leh.

# Family Care Dheefaha Qorshaha

## Yaa ka mid ah kooxda daryeelka?

**Maareeyayaashayada Daryeelka iyo Daryeelka Kalkaalinta Maareeyayaasha ayaa kaa caawin doona inaad maarayso baahiyaha caafimaadkaaga, iyo sidoo kale caafimaadka bulsheed iyo adeegyada bulshada.**



**Adiga, xubnaha ka ah**



**Maareeyaha Daryeelkaaga**



**Maareeyaha Daryeelka Kalkaalinta**



**Daryee-leyaashaada**



**Dhakhaatiir-taada**



**Khubara-dayada**

## Dheefaha aad heli karto:

### Isu-duwaha Daryeelka
Kooxdaada daryeelka ayaa kaala shaqayn doonaan sidii aad u heli lahayd adeegyada aad u baahan tahay marka aad u baahato

### Tababarka Xirfadaha Shaqo
tababarka goobta shaqada iyo taageero xirfadeed

### Adeegyada Terabiga
la-talinta, daaweynta jireed, daawaynta cilladaha hadalka iyo luuqadda

### Dayactirka Guriga
biraha la cuskado, sagxada gur-guraha, qalabka la dhejiyo ee dheeraadka ah

*Adeegyadu waxaa la go'aamiyaa iyadoo lagu salaynayo heerka baahida shaqsiyeed ("u-qalmitaanka waxqabshada jireed") sida uu go'aamiyo Qalabka Waxqabashada Jireed ee Daryeelka Muddada-dheer. Adeegyadu waa inay ahaadaan kuwo lagama maarmaan u ah inay taageeraan natiijooyinka daryeelkaaga muddada-dheer waana inay hubiyaan caafimaadkaaga iyo badqabkaaga.*

### Adeegyada Is-Hagidda
hoggaan u noqo naftaada! Dooro sida iyo cidda ku siinaysa adeegyada

### Gaadiid
gaadiid gaar ah oo aad ku tagto ballamaha aad leedahay, hawlaha maalinlaha ah, shaqada

### Qalabka iyo Sahayda Caafimaadka
qalabka socoska, kursiga curyaanka, qalabka lagula socdo sonkorta dhiigga, qalabka ogsijiinta

### Taageerada Guriyeed
tababarka xirfadaha nolosha maalinlaha ah, cuntada guriga la geeyo, nadaafinta guriga

### Caafimaadka Guriyeed
daryeelka gaarka ah, maaraynta daawada, kalkaalisada xirfadlaha ah

## Xaq ma u Leeyahay inaan ku Biiro?

**Yaa Ku Biiri Kara My Choice Wisconsin Family Care**

- 18 sano jir ama wixii ka weyn ee qaba naafanimada garaadka, jireed, ama korriinka AMA 65 sano jir ama wixii ka weyn
- Aad u qalanto ama hesho kaalmada Medicaid ee gobolka oo la go'aamiyo iyadoo la adeegsanayo dakhliga iyo hantida
- Aad buuxisay shuruudaha u-qalmitaanka qaarkood ee la go'aamiyo iyadoo la adeegsanayo qalabka qiimaynta waxqabashada jireed ee muddada-dheer
- Aad ku nooshahay gobolada barnaamijka Family Care laga helo. My Choice Wisconsin waxay taageertaa barnaamijka daryeelka qoyska ee laga helo 50-ka gobol.

